



MINNEAPOLIS
PUBLIC SCHOOLS
Urban Education. Global Citizens.

10/14/2016

Gacaliyeyaal Qoysaska Wellstone International High School,

Dugsiyada Dadaweynaha Minneapolis (MPS) ayey dhab ka tahay inay siiyaan ardayda oo idil waxbarasho heer sare ah, si cunugaagu ugu guulaysto dugsiya iyo noloshiisa. Si aan u xaqiijino guulaysiga cunugaaga, waxaan u dejinnay heer naqdi sarreeya ee ka fal celin kara waxyaabaha lagu baro fasalladeenna. Sannad dugsiyeedka soo socda waxaan eegaynaa qiimayn cabbirro kala duwan oo muujinaya siyaabaha dugsiyeennu u guulaysanayo. Tan ayaa xaqiijinaysa inaan gaarno himmiladeenna ah in ardayda oo idil ay ku guulaystaan dugsiya iyo noloshooda.

sannadkan Wellstone International High School ayaa loo qoondeeyey inuu noqdo dugsi xoog saaraya (focus school) sida uu qabo Qaynuunka Federaaliga ah ee Dugsiya Hoose & Sare (Elementary and Secondary Education Act) (ESEA). Qoondaynta ayaa ku salaysan xogta hawl fulinta ardayga, taasoo ku meelaynaysay dugsiyeennu inuu ka mid yahay boqolkiiba tobanka ugu badan ee bugcadda guul gaadhka ardayda u dhexeeya ee gobolka.

Sannad dugsiyeedkan waxuu noqonayaa sannadka koowaad ee saddex sano ee habraaca hagaajinta dugsiya (three-year process of school improvement). Qorshayanta habraacaasi ayaa loola jeedaa hagaajinta hawl-fulinta ardayda oo idil. Inkastoo badida waxqabadyada dib u hagaajintu ay yool leeyihiin, isbeddello kale ayaa ka dhici kara dugsiya. Si aan uga guul gaadhno hawshaasi muhiimka ah, waxaan yeelan doonaan koox dib-u-hagaajin ka kooban shardi-hayeyaal kala duwan, ayna ku jiraan waalid. Waxaan idinku dhiirrigalinaynaa inaad xubin ka noqoto kooxda dib-u-hagaajinta; haddii aad danaynayso soo wac lambarka hoose.

Qoysaska iyo bulshada ayaa xuddun u ah qorshaheenna dib-u-hagaajinta dugsiya. Waxaa lugugu martiqaaday inaad nagala soo qaybgasho kulankeena sanadlaha ah ee Xaalada Dugsiya iyo Kulanka Title I. Ula jeedka Xaalada Dugsiya iyo Kulanka Sanadlaha ah ee Title I waa in lugu siiyo waalidka/iyo daryeelayaasha warbixin ku saabsan xaalada dugsiya ku sugan yahay hada iyo qorshaha hagaajinta ee dugsiya. Dugsiya waxaa uu waalidka la wadaagi doonaa hadafkiisa iyo waxyaabaha uu mihiimada siinayo iyo hababka uu ku gaarayo hagaajinta iyo waalidku sidii ay uga qaby qaadan lahaayeen waxbarashada sanadkoo idil. Kulankani waxaa lugu sharixi doonaa ula jeedka Title I iyo xiriirka waalidiinta/daryeelayaasha la rajaynayo in ay helaan waxyaabo qoyseeya kor u kaca waxbarsho ee caruurtooda. Haddii uusan kulanku dhicin ama aadan helin warbixinta, Na soo waydii maalinta iyo wakhtiga kulanka la qaybanayo

Ka qayb qaadashadaada iyo kaalmadaada ayaa muhiim u ah guulaysiga cunugaaga. Waxaan kugu dhiirrigalinaynaa inaad la xiriirto cunugaaga macallimiintiisa, saad u barato sida ugu wanaagsan ee cunugaagu fasalka wax ugu baran karo. waa kuwaan hoose dhawr waxyaabood eed samayn karto ee ka caawin kara cunugaaga waxbarashadiisa:

- Hubi in cunugaagu dugsiya tago maalin walba waqtiga loogu talagalay.
- U same meel deggan oo cunugaagu ku qabto shaqo gurigiisa ama wax ku akhriyo.
- Kala hadal cunugaaga dugsiya.

Waxaan idinka rajeynaynaa inaad sii waddaan ku shuqlanaanta iyo wada shaqaynta si sannad dugsiyeedkani u noqdo mid wanaagsan! Fadlan nagala soo xiriire 612-668-5115 haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah ee la xiriira dadaalka dib-u-hagaajinta dugsiya ama sidaad uga qayb qaadan karto.

Si daacadnimo leh,

Dr. Aimee Fearing
Maamule/Principal